



Slinda®

drospirenon 4 mg 24+4 kiniin.



Waxyaalo ku saabsan Slinda®

Slinda® wa kaniini ka hortagga uurka oo loo isticmaalo si uurka la iskaga ilaliyo, waxay ka kooban tahay qadar yar oo maadada drospirenone-ta ah, taas oo iyadu ah maadada gestagen oo u eeg hormoonka progesterone ee dhedigga. **Slinda®** waa nooc ka mid ah kiniinada ka hortagga uurka kaas oo loo yaqaano kiniinka ay progestogen oo kaliyhi ku jirto. Waxay ka duwan tahay kiniinada ka hortagga uurka ee isku dhafan maadaama oo aanu hormoonka Estrogen uusan kujirin. Sidaa darteed, **Slinda®** waxa sidoo kale isticmaali kara dumarka

- aan qaadaneyn ama aan rabin inay oestrogen qaataan
- ka dib markay ilmo dhalaan
- ee ay naas nuujinayaan

Slinda® waxay uurka ugu joojisaa qayb ahaan iyada oo joojisa dilaaca/ soo saarista ugxanta, iyo qayb ahaan iyadoo xuubka khafiifka ee ilmagaleenka ka dhigta mid ka sii khafiifsan. Waxaa intaa dheer, dheecaanka ka soo baxaaya afka ilmo-galeenka ayaa isbadela iyadoo shahawadana ku adkeynaysa inay dhexgasho.




Kahor inta aanad bilaabin

Xirmo baakad ah oo kasta waxa ku jira 24 kiniin oo caddaan ah iyo 4 kiniin oo macmalka ah oo cagaar ah. Kiniinada midabada kala duwan leh ayaa si habeeysan loo dhigay. Waa muhiim inaad marka hore 24-ka kaniin ee cad qaadato, oo aad ka dibna 4 maalmood isticmaasho kiniinka cagaaran ee aanu hormoon ku jirin. Si lagaaga caawiyo inaad xasuusato inaad maalin kasta kiniinka qaadato, ayaa waxa baakada ku jira 7 sumadood oo sharoot/xabag leh oo ku tusaaya 7 da maalmood ee todobaadka.

Välj den veckodagsetiketten som inleds med den dag då du börjar ta tabletterna. Sätt etiketten på blästerkartan så att den täcker orden "Fäst veckodagsetiketten här". Varje dag hammar i linje med en rad tablett. Det är viktigt att du tar tablettan varje dag. Läs bipacksedeln om du glömmer en tablet.																																																	
Valitse päävätaria, joka alkava päävästä, jona aloitat tablettien otton. Kiinnitä tarra läpäinpainopakkauksen kohtaan, jossa lukee "Kiinnita päävätaria tähän". Kukin päivä onsi tablettirivin kohdalle. Oli tarkeää ottaa tabletti joka päivä. Jos unohtaat ottaa tabletti, lue ohjeet pakkaukselloseesta.																																																	
START/MÖJLITUS ▼ <table><thead><tr><th>Män/Ma</th><th>Tis/Ti</th><th>Ons/Ke</th><th>Tors/To</th><th>Fre/Pe</th><th>Lör/La</th><th>Sön/Su</th></tr></thead><tbody><tr><td>Tis/Ti</td><td>Ons/Ke</td><td>Tors/To</td><td>Fre/Pe</td><td>Lör/La</td><td>Sön/Su</td><td>Män/Ma</td></tr><tr><td>Ons/Ke</td><td>Tors/To</td><td>Fre/Pe</td><td>Lör/La</td><td>Sön/Su</td><td>Män/Ma</td><td>Tis/Ti</td></tr><tr><td>Tors/To</td><td>Fre/Pe</td><td>Lör/La</td><td>Sön/Su</td><td>Män/Ma</td><td>Tis/Ti</td><td>Ons/Ke</td></tr><tr><td>Fre/Pe</td><td>Lör/La</td><td>Sön/Su</td><td>Män/Ma</td><td>Tis/Ti</td><td>Ons/Ke</td><td>Tors/To</td></tr><tr><td>Lör/La</td><td>Sön/Su</td><td>Män/Ma</td><td>Tis/Ti</td><td>Ons/Ke</td><td>Tors/To</td><td>Fre/Pe</td></tr><tr><td>Sön/Su</td><td>Män/Ma</td><td>Tis/Ti</td><td>Ons/Ke</td><td>Tors/To</td><td>Fre/Pe</td><td>Lör/La</td></tr></tbody></table>	Män/Ma	Tis/Ti	Ons/Ke	Tors/To	Fre/Pe	Lör/La	Sön/Su	Tis/Ti	Ons/Ke	Tors/To	Fre/Pe	Lör/La	Sön/Su	Män/Ma	Ons/Ke	Tors/To	Fre/Pe	Lör/La	Sön/Su	Män/Ma	Tis/Ti	Tors/To	Fre/Pe	Lör/La	Sön/Su	Män/Ma	Tis/Ti	Ons/Ke	Fre/Pe	Lör/La	Sön/Su	Män/Ma	Tis/Ti	Ons/Ke	Tors/To	Lör/La	Sön/Su	Män/Ma	Tis/Ti	Ons/Ke	Tors/To	Fre/Pe	Sön/Su	Män/Ma	Tis/Ti	Ons/Ke	Tors/To	Fre/Pe	Lör/La
Män/Ma	Tis/Ti	Ons/Ke	Tors/To	Fre/Pe	Lör/La	Sön/Su																																											
Tis/Ti	Ons/Ke	Tors/To	Fre/Pe	Lör/La	Sön/Su	Män/Ma																																											
Ons/Ke	Tors/To	Fre/Pe	Lör/La	Sön/Su	Män/Ma	Tis/Ti																																											
Tors/To	Fre/Pe	Lör/La	Sön/Su	Män/Ma	Tis/Ti	Ons/Ke																																											
Fre/Pe	Lör/La	Sön/Su	Män/Ma	Tis/Ti	Ons/Ke	Tors/To																																											
Lör/La	Sön/Su	Män/Ma	Tis/Ti	Ons/Ke	Tors/To	Fre/Pe																																											
Sön/Su	Män/Ma	Tis/Ti	Ons/Ke	Tors/To	Fre/Pe	Lör/La																																											

Dooroo sumada maalinta todobaadka ee ku bilaabmaysa maalinta aad kiniinka koowaad qaadato (tusaale ahaan, haddii aad maalin Arbaco ah billowdo isticmaal summada maalinta todobaadka ee ku bilaabanta "ONS") oo dul saara xirmada baakada ee ereyada, dushooda si ay maalinta ugu horreysa ugu dulsaaranto kiniinka "START". Hadda ayay maalin kasta oo todobaadku kaniini dul saarnaan doontaa, si af swedish ah aad ugu aragto in aad kiniinka maalintaas qaadatay iyo in kale. Fallaarahi iyo lambaradu waxay tusayaan habka kiniinka loo qaadanaayo. Marka ay hal xirmo baakad ah oo kiniinku ku jiro ay dhamato, ayaad isla markaaba ku sii wadaysaa mid cusub. Waxa laga yaabaa inaanad biririf ama hakan u kala dhaxeysiin laba xirmo baakad ah.



Billoow inaad isticmaasho Slinda®

Slinda® waa in maalin kasta loo qaataa, habka saxda ah, iyo qiyas ahaan maalin kasta waqtii isku mid ah. Waxa uu Jadwalka hoosta ku yaalaa kuu sharaxayaa sida loogu bilaabaayo Slinda®, ama sida looga soo badelaayo aalada ka hortagga urka ee kale.

Aan wax ka hortagga urka ee hormoonnada leh isticmaalin bishii ugu dambeysa gudaheeda	Ka soo bedelasho kaniiniyada ka hortagga urka ee isku dhafan ¹	Ka soo bedelasho cinjirka xubinta taranka la galiyo ¹ ama balasterka ka hortagga urka ¹	Ka soo bedelasho kaniiniga yarar ee ka hortagga urka ² ama kaniinka ay progestogen oo kalyihi ku jirto (progestogen-only-pill ama POP) ²	Ka soo bedelasho cirbada ka hortagga urka, usha balastiga ah ee la is galiyo ee ka hortagga urka, ama hormoonnada IUD
Billoow inaad isticmaasho Slinda® maalinta koowaad ee wareegga dabiciiga ah ee caadadaada (maalinta koowaad ee dhiigu kaa yimaado).	Billoow inaad isticmaasho Slinda® maalinta ka danbeysa maalinta aad qaadatay kiniinkaagii dawada lahaa ee ugu dambeeyay ee kiniinkaagii hore ee ka hortagga urka ee isku dhafnaa.	Bilow inaad isticmaasho Slinda® isla maalinta aad iska saarayso cinjirka xubinta taranka ama balastarka ka hortagga urka.	Waxaad joojin kartaa isticmaalka kiniinka yaryar ee ka hortagga urka/kaniinka ay progestogen oo kalyihi ku jirto oo bilow inaad Slinda® maalinta xigta isticmaasho.	Billoow isticmaalka Slinda® isla maalinta lagaa saaray usha balastiga ah lagu galiyey ama hormoonka IUD, ama maalintii ay ahayd inaad irbadaada xigta ee ka hortagga urka qaadato.
	Ugu dambeyn, waxaad sidoo kale bilaabi kartaa inaad Slinda® isticmaasho maalinta ka dambeysa maalinta aad hakiso kiniinka ka hortagga urka, cinjirka xubinta taranka ama balastarka. Xaaladahan oo kale, isticmaal difaac dheeraad ah (tusaale ahaan cinjirka galma) inta lagu jiro 7 maalmood ee ugu horreeya ee aad Slinda® isticmaalayo.	1) waxa ku jira laba nooc oo hormoonno ah: Oestrogen iyo Gestagen	2) kalyi uu ku jiro hal nooc oo hormoon ah: Gestagen	

Raac talada aad ka helayo dhakhtarkaaga/umulisadaada haddii aad bilowdo inaad isticmaasho Slinda® ka dib markaad isticmaasho kiniinkaaga ka hortagga urka ee degdega ah, aad ilmo iska soo tuurtay, aad umushay, ama sida "bilow degdeg" ah oo kale.

Haddii aad umushay

Waxaad bilaabi kartaa inaad **Slinda®** 21 isticmaasho ilaa 28 maalmood ka dib markaad umushay. Haddii aad bilowdo wax 28 maalmood ka danbeeyaa, laakiin ka horeeya intaanay caadadu kugu soo laaban, fadlan hubi in aanad uur lahayn. Isticmaal waxyaalaha dheeraadka ah ee la isku illaaliyo (sida cirjirka galmeda) 7 maalmood ee ugu horeeya ee aad kiniinka qaadaneyso.

Haddii aad dhawaan galmo samaysay, fadlan hubi in aanad uur lahayn ka hor inta aanad bilaabin isticmaalka **Slinda®**.

Slinda® waxa sidoo kale isticmaali kara dumarka naas nuujinaaya. Qadar aad u yar oo maadada ku jirta **Slinda®** ayaa laga yaabaa inay u soo gudubto caanaha naaska, laakiin taasi lama filaayo inay saameyn ku yeelato ilmaha hadda soo dhashay/nuunuga ah ee naaska nuugaaya.

Haddii aad xanuunsato

Haddii aad matagto ama shuban badan kugu dhaco, ayaa waxa iman karta khatar ah inaanu jidhkaaga galin maadada dawada kiniinka ku jirta.

Waxay taasi la mid tahay sidii adiga oo hilmaamay inaad kiniinka qaadato oo kale. Kiisaska sidan oo kale ah, waxaad u baahan doontaa inaad isticmaasho waxyaalaha dheeraadka ah ee la isku illaaliyo. Weydii dhakhtarkaaga/umulisadaada wixii tallo ah.

Haddii aad matagto ama aad shuban badan yeelayo 3-4 saacadood gudahood ka dib markaad kiniinka cad ee maadada dawadu ku jirto ee

Slinda® qaadato, waa in aad isla markiiba qaadatid kaniini cad oo cusub oo laga soo qaadey xirmada baakada ee xigta. Haddii ay suurtagal tahay, qaado kaniinka 24 saacadood gudahood laga bilaabo wakhtiga caadiga ahaa ee aad kaniinka qaadan jirtay. Wax difaac ah oo kale looma baahna. Haddii aanay taasi suurtogal aheyn, ama haddii 24 saacadood ay ka soo wareegeen, fadlan raac talada ku taal "Haddii aad hilmaantey inaad qaadato **Slinda®**" ee bogga xiga.

Haddii aad hilmaantey inaad qaadato Slinda®

Haddii aad hilmaantey inaad kiniin qaadato, qaado kiniinka aad hilmaantey isla marka ugu horeysa ee aad xasuusato, ka dibna kaniinka ku xiga wakhtigiisii caadiga ahaa qaado, xitaa haddii ay taasi micnaheedu yahay inaad laba kaniini isku mar qaadaneyso. **Haddii wax 24 saacadood ka badan ay ka soo wareegreen**, isticmaal waxyaalaha kale ee la iskagu illaaliyo ee dheeraadka ah (tusaale ahaan cinjirka galmada) 7 maalmood ee xiga.

Marba marka uusii bato hilmaamida qaadashada kiniiniga, waxaa sii badanaaya halista difaaca.

Haddii aad hilmaantay inaad kiniini qaadato muddad todobaadka ugu horeeya ee kiniinka la qaadanaayo lagu jiro oo aad galmo samaysey xilligii todobaadkii ka horeeyey ee aad hilmaamtey inaad kiniinka qaadato, ayay khatar inaad uur leedahay jirtaa. Xaaladaha sidan oo kale ah, fadlan la xiriir dhakhtar/umuliso.

Haddii aad hilmaantay inaad kaniini qaadato inta u dhaxaysa maalmaha 15 iyo 24 (safka saddexaad ama safka afraad), Qaado kiniiniga aad hilmaantay isla markiiba marka aad xasuusato, xataa haddii tani micnaheedu yahay inaad qaadato labo kiniini isku mar. Sii wado inaad kiniinka dawada leh ee cad wakhtigiisii

caadiga ahaa qaadato. Ha qaadan kiniinada macmalka ah ee cagaarka ah, ee laakiin iska tuur kuwaas oo isla markiiba bilow toddobaadka xiga (waxaad bilaabi doontaa maalin toddobaadka oo ka duwan). Markaad kaniinka macmalka ah ka boodo, ayaad weli leedahay difaac kaa ilaalinaaya inaad uur qaado.

4-ta xabo ee kaniini cagaaran ee ugu dambeeya ee ku jira xirmada baakada waa kiniin macmal ah. Haddii inaad qaadashada kiniinkaa qaar mid ka mid ah hilmaamtey, ayaanay waxtarka difaaca ka hortagga urka saameyn doonin. Iska tuur kiniinka macmalka ah ee la hilmaamay.

Dawooyinka qaarkood iyo (dawooyinka dhaqan ahaaneed) dawooyinka dhirta ku salaysan ayaa dhimi kara waxtarka **Slinda®**. Dakhtarkaaga/umulisadaada ayaa kuu sheegi karta haddii aad u baahan tahay inaad isticmaasho aalada ka hortagga urka oo dheeraad ah, iyo muddadda aad isticmaaleys.

Waa inaad sidoo kale xasuusataa in **Slinda®** ay saameyn karto waxtarka daawooyinka kale qaarkood, iyadoo waxtarkooda ama kor u qaadeysa ama hoos u dhigeysa. Taas wax dheeraad ah ka sii akhriso warqada baakada dawada.

Haddii laga yaabo inaad wax saameyn xun ah yeelato

Sida kiniinada kale ee ka hortagga uurka la mid ah ayay **Slinda®** keeni kartaa saameyn xun, laakiin dadka isticmaala oo dhami ma wada yeeshaan astaamahaan.

Saameynaha xun ee imaan kara waxa ka mid ah lallabo, damqasho naasaha, madax xanuun, muudhka oo isbedbedela, iyo finan. Wuxaad sidoo kale yeelato dhiigbax aan joogto aheyn, ama inaan wax dhiig ahi kaa imaan haba yaraatee. Dhiigbax aan joogto ahayn ma aha calaamad

muujinaysa in ka hortagga uurka ee **Slinda®** ay waxtarkeedii lumisay. Haddii aad dhiigbax xun/muddo dheer socda leedahay, ama saameyn xun oo soo noqnoqota, la hadal dhakhtarkaaga/umulisadaada.

Warqada baakada dawada ka akhriso waxii dheeraad ah ee ku saabsan saamaysta xun ee imaan kara.

Isla markiiba la xiriir dhakhtar haddii:

- haddii aad dareemayo xanuun daran ama barar hal lug ah, xanuun laabta oo aan la garanayn, dhibaatooyinka neefsashada ama qufac aan joogto ahayn (waxa laga yaabaa inay calaamad u tahay xinjir dhiiga)
- aad dareento fud naaska kaaga yaala (waxa laga yaabaa inay calaamad u tahay kansarka naasaha)
- aad dareento xanuun caloosha oo hal mar kugu soo booday oo daran, ama calamadaha cagaarshoowga (maqaarka iyo caadka indhahaaga oo jaale noqda, ama kaadi madow, taas oo noqon karta calaamad dhibaatooyin beerka ah muujinaysa).
- aad dareento xanuun caloosha xageeda hoose ah oo hal mar kugu soo

booday oo daran (waxa laga yaabaa inay calaamad u tahay uurka meel ka baxan afka ilmo galeenka ku sameysma)

- aad noqoto qof sariirta aan ka kici karin ama qaliin weyn ayaa laguu samayn doonaa
- ay dhacdo in aad u dhiig baxdo si aan caadi ahayn, oo aad u xun oo xubintaada taranka ka imaneysa
- aad ka shakisan tahay inaad uur leedahay

Haddii aad u baahan tahay inaad tallo bixin caafimaad raadsato, fadlan xasuuusnoow inaad dhakhtarka u sheegto inaad kiniinka progestogen oo kaliya een ku jirto isticmaalayso (kiniinnada ka hortagga uurka ee bilaa estrogenka ah).

Slinda® (drospirenone) 4 mg kiniini dahaaran. **Calaamadaha:** Slinda® waxa weeye kaniini ka hortagga uurka oo loo isticmaalo si loogu hortago uurka. **Digniino iyo taxadir:** Ha isticmaalin Slinda® haddii aad qabtid, ama laga shakisan yahay inaad kansar qabtid, aanad u adkeysan hormoonnada galmaada, aad leedahay xinjirowga dhiigga oo xididdada dhiigga ama sambabada kaaga yaala, shaqada beerka oo dacif ah, kelyaha oo istaagey, ama dhiig baxa farjiga ah oo aan la garaneyn. **Isla markaaba dhakhtar/umuliso la xiriir haddii:** aad leedahay xanuun badan ama barar hal lug ah, xanuun aan la garanayn oo laabtaada ah, caqabadaha neefsashada, qufac aan caadi ahayn, gaar ahaan haddii aad dhiig soo qufacdo (waxaa laga yaabaa inay astaan/calaamad u tahay xinjiraha dhiiga), aad yeelato xanuun caloosha oo hal mar kugu soo booday oo daran ama calaamadaha cagaarshow (midab huruud ah oo maqaarka ama caadka indhaha aad ku yeelato ama kaadi madow, oo laga yaabo inay tilmaamayo dhibaatooyin xagga beerka), waxaad leedahay fud naaskaaga ku yaala (kaas oo laga yaabo inay calaamad u tahay kansarka naasaha), waxaad leedahay xanuun hal mar kugu soo booday calooshaada xageeda hoose ama calooshaada (waxa laga yaabaa inay calaamad u tahay uurka ectopic, tusaale ahaan uur ku sameysma meel ilmo galeenka ka baxsan), waxaad tahay qof sariirta aan ka kici karin ama qaliin loo sameyn doono (talo weydiiso dhakhtarkaaga/umulisadaada ugu yaraan afar todobaad ka hor) waxaad dareemeysaan xanuun aan caadi aheyn, dhiigbax farjiga oo aan badan ama waxaad ka shakisan tahay inaad uur leedahay. Dumarka isticmaala hormoonnada ka hortagga uurka qaarkood, kuwaas oo ay ku jirto Slinda®, ayaa soo sheegay in ay la kulmeen niyad jab ama dareen aan fiicnayn. Haddii aad dareento in muudhkaagu is badelay, ama haddii aad dareento calaamado diiqa oo kale ah, waa inaad isla markaaba la xiriirtaa dhakhtar/umuliso si aad talobixin caafimaad ugu hesho. Ka fiiri warqada baakada dawada wixii macluumaaadka dheeraad ah ee daawada iyo xaaladaha laga yaabo inay lagaaga baahdo inaad isticmaasho difaacyo dheeraad ah (tusaale cinjirka galmaada) ku saabsan.

Urka iyo naasnuujinta: Ha isticmaalin Slinda® haddii aad uur leedahay, ama aad u malaynayo inaad uur leedahay. Slinda® ayay dumarka wax naas nuujinaya isticmaali karaan. Si taxadir leh warqada baakada dawada ugu akhri ka hor inta aanad isticmaalin Slinda®. Waxa ku jira macluumaaad adiga kuu muhiim ah. Xiriirka: Exeltis Sverige AB, Strandvägen 7A, 114 56 Stockholm, Sweden. Telefoonka: +46 (0)8- 586 335 10. Iimaylka nordics@exeltis.com. Macluumad la soo gaabihey oo ku salaysan xaashida baakadaha ee ku taariikhaysan 14/06/2023.

Xogta waxa hubiyay Kristina Gemzell Danielsson, Borofisoor ku takhasusay
dhalmada iyo cudurada haweenka, Diiseembar 2019.